



Sheydaankaa u imaan midkiin wuxuuna ku dhihin yaa abuuray kaas yaa abuuray kaas? Ilaa uu yiraahdo yaa abuuray Rabigaa, haduu halkaa soo gaaro ilaahay ha ka magan galo oo ha ka joogsado

Abuu Hureyra Allaha ka raali noqdee waxaa laga wariyey in Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee yidhi: Sheydaankaa u imaan midkiin wuxuuna ku dhihin yaa abuuray kaas yaa abuuray kaas? Ilaa uu yiraahdo yaa abuuray Rabigaa, haduu halkaa soo gaaro ilaahay ha ka magan galo oo ha ka joogsado.

[Xadiis Saxiix ah.] [Xadiis la isku waafaqay]

Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu sheegay daawada ugu fiican ee su`aalaha uu ku waswaasiyo sheydaanku mu'uminka. sheydaanku wuxuu oran: yaa abuuray kaas? yaa abuuray kaas? yaa abuuray samada? yaa abuuray dhulka? Mu'uminku wuxuu ugu jawaabayaa diin ahaan, fidro ahaan iyo caqli ahaan isagoo dhahaya: Allaah. laakiin sheydaanku kuma joogayo waswaaska xadkaasa balse wuxuu u gudbaa inuu dhoho: yaa abuuray Rabigaa? Markaas mu'uminku wuxuu waswaaskaas isaga joojin karaa saddeex arimood. Ilaahay oo uu rumeeyo. Iyo Ilaahay oo uu shaydaanka ka magan galo. Iyo inuu ka joogsado inuu waswaaska sii wado.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65013>

